# CARUURTA QOYSASKA LUUQADAHA BADAN KU HADLA

# BUUGYAR OO WARBIXINEED

## SOMALISK



OSLOMET
NAFO
Nasjonalt senter for flerkulturell opplæring

## HORDHAC

Buug yarahani wxuu diiradda saari doonaa 10 suáalood oo waalidiintu iska waydiiyaan habka barashada luuqadah badan ee caruurtooda. Waxa kale oo buugyarahan loogu talagalay shaqaalaha xanaanooyinka,dugsiyada iyo shaqaalaha xarumaha caafimaadka si ay ugu noqoto fure ay ugaga faaiidaystaan wada hadalka iyaga iyo waalidiinta marka laga hadlayo horumarinta barashada afafka ee caruurta.

Buugyarahan waxaa laga soo minguuriyay buugyare iswiidhish ah oo la yidhaahdo (*Två språk eller flera – Råd till flerspråkiga familje* ) taas oo uu qoray amma diyaariyey macahadka cilmi baadhista luuqadaha ee magaalada Rinkeby. *Buugyarahani wuxuu faaiido iyo waxtar uleeyahay caruurta luuqadaha badan ku hadasha ee dhigta xanaanooyinka iyo dugsiyada Noorweey.*



## KU HADALKA LUUQADAHA BADAN

Bulshada aduunku intooda badani waxay ku hadlaan dhawr luuqadood. Ku hadalka luuqadaha badani waa aqoon weyn oo waxtar u ah qofka iyo bulshadaba. Luuqaddu waxa ay astaan u tahay qofka asal ahaantiisa, dhaqankiisa iyo xidhiidhka bulshadiisa taas oo lagama maarmaan u ah koritaanka caruurta iyo nolosha dadka waaweynba.

Qoysaska ku hadla laba luuqadood amma in ka badan waxay u leedahay faa’iido badan taas oo xoojisa waxtarna u leh xanaanooyinka,dugsiyada iyo bulshaweyntaba.

### Kala duwanaanshaha qoysaska laba-luuqadoodlaha ah

Qoysasku waxay u kala qaybsamaan qayb laba- luuqadoodle ah iyo qaybo in ka badan lab-luuqadood ku hadla.

- Mid amma labada waalidba waxay ku hadlaan luuqadood hooyo oo aan ahayn noorwiiji.
- Labada waalid oo midba luuqad gooniya ku hadlo taas oo ay caruurtu bilowga koritaankaba ay bartaan laba luuqadood.
- Mid amma labada waalidba iyaga oo ku koray qurbaha oo ku hadla luuqado badan.

Waxa kale oo iyana qayb ka qaata koriinka caruurta ehel iyo qaraabo kale oo luuqado kala duwan ku hadla.



## 1. CARUURTO MA BARAN KARTAA AFAF BADAN ISKU MAR?

Caruurtu way baran karaan afaf badan isku mar taas oo qaybo badan aduunyada caadi ka ah. Haddaba ilmuhu si uu luuqadda uu baranayaa u noqoto mid midho dhal ah waa in guriga, xanaanada iyo dugsiguba ka hawl galaan. Waa waajib in dadka waaweyn ee ilmaha

xidhiidhka la lehi in ay ay ku dhiiri geliyaan in uu ilmuhu barto luuqadaha.Qøysaska qurbaha u soo hayaamay qiimo badan bay u leedahay in ubadkoodu bartaan afka-hooyo si uu xidhiidhka ehelkood iyo qaraabadoodu u jiro. Barashada afka hooyo wuxuu adkeeyaa ubadka dhaqankiisa iyo aslnimadiisa halkuu ka soo jeedo.

## 2. ILMUHU MA BARANKARAA AFKA NOORWIIJIGA HADDI AY WAALIDIINTU AFKOODA HOOYO GURIGA KAGA HADLAAN?

Caruurtu haddii ay afkooda hooyo si mugle u bartaan way u fududahay in ay luqad kalena bartaan.luuqadda afka-hooyo waxay ilmaha ka caawisaa in uu luuqada kalena si sahala u barto, haddii aynu u kuur galno barashada luuqadaha, haduu ilmahu barta erayga ¨gaajaysan¨waxa u fududaanaysa inuu bartu erayga noorwiijiga ah ee ¨sulten¨.

Waalidiintu waxa ay jecelyihiin in caruurtoodu waxbarashada kaalin mug leh ka qaataan si uu mustaqbalkoodu u hirgalo, sidaa awgeed waxa ay jecel yihiin in ubadkoodo barto si deg deg ah luuqada noorwiijiga, taas ma aha in ay waalidku joojiyaan in ay caruurtooda kula hadlaan afkooda hooyo. Waa in ay waalidiintu ku dedaalaan in caruurtoodu dhex gasho bulshada sida xanaanooyinka si ay caruurtu ula kulmaan afafka kale ee bulshooyinka.

## 3. HADDII LABADA WAALID KU HADLAAN LABA LUUQADOOD OO KALA DUWAN TEEBAY CARURTA KULA HADLAAN?

Haddii qoysku luuqada kala duwan ku hadlo waa in ay hooyado caruurta kula hadashaa afkeeda hooyo, sidoo kalena waa in uu aabuhu kula hadlaa caruurta afkiisa hooyo.Marka qoysku ay meel wada fadhiyaan waxay dooran karaan tay u arkaan in ay dhamaantood u sahlantahay. Waxaa lagama maarmaan ah in waalidku caruurta kula hadlo luuqadda uu aadka u yaqaano. Qoysaska mid waalidiinta ka mid ahi noorwiiji yahay waxay u badan tahay in caruurtu ay luuqadda noorwiijiga ahi xooga yeelato markaas haddii ay waalidiintu rabto in ay caruurtu laba-luuqadoodle noqoto waa in ay labada afba guriga kaga hadlaan waalidkuna waa in ay ku caawiyaan.



# 4. SIDEE ARRIN NOQONAYAA HADDII CARUURTU LUUQADAHA ISKU BADHXAAN?

Waa arrin iska caadi ah in caruurta lab-luuqadoodlaha ahi isku badhxaan marka ay hadlayaan iyaga oo erayo ka soo amaahda luuqadda kale . Taas waxaa lagu sababayn karaa iyada oo aanu ilmahu weli kala saari karin labada-luuqadood. Amma in marka uu hadalka ku margado uu afka kale eray ka soo amaahdo si uu u dhamaystiro hadalkiisa. Taas oo macnaheedu yahay in uu ilmuhu ka faa'iidaysanayo luuqadaha uu yaqaano.

Waxa kale oo iyana dhaqan noqotay in caruurta laba-luuqadoodka ahí markay la hadlayaan ilma kale oo isna sidiisa laba-luuqadoodle ah in ay kulba luqad ku hadlaan oo ay kala bedbedalaan, si ay kolba ta u sahlan ugu muujiyaan dareenkooda. Haddaba arrinkaasi wuxuu culays ku noqda amma isfahamla'aan ku abuuraa qofka luqadda kaliya ku hadla.

Xeeldheerayaasha luuqduhu waxay bayaamiyeen in loo baahanyahay si xeeldheer loo adeegsado isku bedelka labada-luuqadood, oo ay noqto arrin dabeeciya in labada-luuqadood oo si miisaaman isugu dheeli tiran.

Sida aynu wada ogsoonahay caruurta laba luuqadoodlaha ahi xaalado kala duwan bay ukala adeegsadaan afafka markaasi waa in uu noqdo afkoodu mid tayaysan. Hadaynu tusaale soo qaadano marka uu ilmuhu ka sheekayanayo wixii  xanaanada maanta ka dhacay waxaa u

fudud in uu ku sheekeeyo afka noorwiijiga, haddii uu arrin guriga ka jira ka hadlayana waa in uu afka-hooyo ku hadlaa, waxa iyana kobaca afka-hooyo qayb ka qaata in ilmahu uu waalidkii iyo walaalihii ku la hadlu afka-hooyo.

## 5. MAXAA KULA GUDBOON HADDI ILMUHU KU JAWAABO AFNOORWIIJIGA OO KELIYA MARKUU GURIGA JOOGO?

Arrinkani mid uguba maaha ee waa iska caadi in caruurta laba-luuqadoodlaha ahi ay afka noorwiijiga ku jawaabaan in kastoo waalidku ku dedaalo in uu ilmuhu ku hadlo afka-hooyo.Markaas waalidka waxaa la gudboon in uu ilmaha ku dhiiri galiyo in uu ku jawaabo afka-hooyo kana caawiyo in uu si fiican ugu hadlo afka-hooyo.Waalidiintu waa in ay xoojiyaan la sheekaysiga caruurtooda iyaga oo tixgalinaya luuqadda ay ku hadlayaan si uu ilmuhu u dareemo in la dhagaysanayo hadalkiisa. Waalidku waa in uu u samro barashada afka-hooyo ee caruurtooda iyaga oo tixgalinayaa in ilmuhu ku dhex barbaarayo bulsho luuqad kale ku hadasha.

Si ay caruurto u barato afkooda hooyo waa in ay waalidiintu ku dedaalaan in ay caruurta kula hadlaan afkooda hooyo.

Waxa kaloo caruurta caawimo weyn u ahaan lahaa in ay jiraan caruur kale oo ay isku afyihiin oo ay luuqaddooda ku wada hadlaan,taasi oo ilmaha wax badan u tari lahayd. Inkasta oo aanay caruurtu afkooda hooyo si fiican ugu hadli karin haddanna fahamkiiso aad buu u wanaagsanyahay markaad barbar dhigto ku hadalkiisa,taasina waxay horseedi doontaa in uu fahamka afkiisa hooyo kor u kaco.

## 6. SIDEE BAYNU KU CAAWIN KARNA IN CARUURTU AFKOODA HOOYO HORE UGU MARIYAAN?

Caruurta Turkiga ah ee ku nool Turkiga iyo kuwa Noorwiijiga ah ee ko nool Noorway, labadooduba  xaalado kala duwan bay u bartaan afkooda,tusaale ahaan bulshada kale duwan ee ay ku dhex nool yihiin sida waalidkood, caruurta ay la ciyaaraan, qaraabadooda, xanaanooyinka, dugsiyada, gaadiidka dadweynaha iyo jaararka. Taasi waxay caruurta u suuragelisay in ay markasta dhex joogaan bulsho afkooda hooyo ku hadlaysa. Haddab xaaladda caruurta ajaanibka ah ee ku nool Noorway taas aynu soo sheegnay way ka duwantahay sababta oo ah caruurtani fursad uma hesho in ay afkoodu hooyo bulshada kula

hadlaan taas oo hoos u dhigaysa horomarka ku hadalka afka-hooto, goobta kaliyah ee ay suuragal tahay in ay caruurtu ku hadasho afkooda waa gurigooda oo kaliya. Mar haddii arrinku sidaa yahay waxaa waalidka, xanaanooyinka iyo dugsiyadaba looga baahanyahay in ay iska kaashadaan in ay hore u mariyaan ilmaha afkiisa hooyo.

Degmooyin badan ayaa suurta geliyey deeqo bilaash ah oo xanaanooyinka ah taas oo caruurta iyo waalidiintuba wada joogi karaan ,taas oo ay kula kulmi karaan caruur iyo waalidiin kale oo ay ka wada qayb qaataan la ciyaarka caruurta iyo sheekaysigaba. Degmooyinka qaarkood waxaa ku yaala maktabado wakahtiyo leh lagu akhriyo sheekooyin luuqadaha kala duwan,waxa kaloo maktabadaha laga helaa buugaag iyo cajalado la dhegaysto oo laga amaahan karo.Waxa kale oo waalidiinta,xanaanooyinka iyo dugsiyaduba ka faa'iidaysan karaan maktabada luuqadaha badan ee  Deichmanske bibliotek ee ku taal Oslo. Maktabadaa waxaad ka heli kartaa buugaag loogu talagalay caruur iyo dad waaweynba oo ku qoran luuqadaha kala duwan. Habka aad u dalbanayso waxaa kaa caawin kara maktabadaha degmada aad degantahay.waxaad kale oo aad ka dheehan kartaa amma ka dhegaysankartaa casharo mareegta la yidhaahdo

## 7. MAXAYNU U QABAN KARNAA CARUURTA NOORWAY KU NOOL SI AY U KORODHO AQOONTOODA AFKOODA-HOOYO?

Caruurta laba-luuqadoodlaha ah marka xanaanooyinka la geeyo wuxuu wax tar weyn u yeelaa in ay caruurtu afka noorwiijiga barashadiisu kobocdo. Wax iyana lagama maarmaan ah in wadashaqayn wax ku ooli ka dhex jirto waalidiinta, xanaanooyinka,baraha caafimaadka iyo dugsiysda.Waxaa waajib ah in xanaanooyinka iyo dugsiyaduba ka shaqeeyaan horumarinta afka noorwiijiga ee ardayda isla markaa waalidka isna waa in uu kaalintiisa buuxiyaa.Waalidiintu waa in ay caruurta ka caawiyaan cashar luuqadeedka xanaanooyinka iyo dugsigaba.

Xanaanooyinku waa in ay barshada luuqadda ilmaha hore u mariyaan, marka uu dugsiga bilaabana waa in uu dugsigu kaalintaa buuxiyaa, waxa kale oo iyana muhiim ah in ilmahu ka qayb qaato cayaaraha kala gadisan sida kubaddaha, heesaha iyo wixii la mid ah. Waalidkuna waa in ay ilmaha ku dhiiriyaan arrinkaa. Xannaanada-carruurtu waxay iyagoo wadashaqaynaya isna-fahamsan guriga ilaalinayaa ilmaha baahidiisa daryeel iyo ciyaar iyo inuu horumariyo barashada  iyo waxbarashada si gundhig u ah horumarka dhinac walba,

iyaga oo tixraacaya manhajka xannaanada-carruurtu wuxuu ka kooban yahay iyo waajibaadka, taasi oo ah in ay ka caawiyaan in uu ilmahu isticmaalo afkiisa hooyo isagoo islamarkaana baranaya amma hore u marinayan afka-noorwiijiga. Waxaa loo bahanyahay in ay waalidiintu kala tashadaan barayaasha xanaanada habka u haboon ee ilmuha lagu dhiiri gelin lahaa si uu hore ugu mariyo barashada afka, haddi ay noqon lahayd in kalkaaliye ilmuhu u baahanyahay amma macalin afka ah.



## 8. WAA MAXAY SABABTA AY CARUURTA QAARKOOD U HADLIN MARKAY JOOGAAN XANAANADA?

Marka ay caruurto baranayaan af ku cusub, siyaabo kala nooca ayey u kala bartaan, caruurta qaarkood markiiba way isku dayaan in ay erayo afka cusuba ku tiraabaan amma weedho xidhiidhsan, caruurta qaarkoodna muddo ayey ku qaadataa in ay erayo ku tiraabaan. Marka ilmahu bilaabo xanaanada isaga oo aan ku hadli karin afka lagaga hadlayo xanaanada waa arrin ilmaha culayskiisa ku leh. Haddaba wakhtigaa ilmuhu wuxuu u baahanyahay in shaqaalaha xanaanado ay fiiro gaar ah ilmahaa u yeeshaa si uu u dareemo xasilooni,iyaga oo isticmaalya habka fara ka hadalka iyo wixii la mid ah ee ilmaha ku dhiirigalinayo in uu

dhiirado xasiloonina dareemo. Caruurtu had iyo jeer waxa ay urursadaan erayo iyo warar iyaga oo aan ku hadli karin afka cusub. Qayb caruurta ka mid ah muddo ayey ku qaadataa in ay afka bartaan asbaabo kala duwan awgeed markaasi waxaa looga baahanyahay waalidka iyo barayaasha xanaanaduba in ay wad tashi ka yeeshaan sidii loo caawin lahaa ilamaha oo ay caawimo waydiistaan ha'adaha gaarka u ah haddii loo baahdo.Inkastoo ilmuhu aanu kula kulmin xanaanada caruur kale amma dad waaweyn oo ku hadla afkiisa hooyo haddan waa lagama maarmaan in la dhiirigaliyo in u ilmahu ku hadlo afkiisa hooyo.

Waalidiinta waxaa loooga baahanyahay in ay caruurta kula hadlaan afkooda, shaqaalaha xanaanadana waxaa lagu boorinayaa in ay erayo ilmaha afkiisa hooyo ah bartaan amma hees taas oo marka uu ilmuhu maqlo kalsoonidiisa dhiiri gelinaysa. Waxa iyana waxtar noqon lahayd haddii uu qof weyn oo ilamaha afkiisa ku hadlaa ka mid yahay shaqaalaha.

## 9. CARUURTU XANAANADA DHIGATAA MA U BAAHANTAHAY CAAWIYE LABA-LUUQADOODLE AH?

*Tiro ka mid ah caruurta lagu xanaaneeyo xanaanooyinka waxa ay ku hadlaan luuqad aan ahay noorwiiji. Markaas waxaa muhiim ah in la afgarto caruurtaa oo tixgelin la siiyo si'dii loo afgaran lahaa.Xanaanado waa in ay ilmaha ku caawisa in uu afkiis ku hadla isla markiina lagu dedaalo in u bartao afka noorwiijiga*.

Waxaa caruurta lagu caawiyaa siyaabo badan oo kala duwan iyada oo aan xataa shaqaaluhu ilmaha afkiisa aqoon.Waxaa haddaba taageero u noqonaysa ilamaha in la helo kalkaaliye afkiisa ku hadla.

Shaqaalaha laba-luuqadoodlaha ahi wuxuu waxtar weyn u leeyahay qaybna ka qaataa xasiloonida ilmaha iyo waalidkaba, waxaanay isku xidhaan xannaanada iyo guriga si hufan oo waxay u helayaan kalsoonida ilmaha ay afkiisa ku hadlayaan, taas oo iyana jid loo maro noqonaysa barashada afka-noorwiijiga.



# 10. CARUURTU MARKA AY DUGSIGA BILAABAYSO

Caruurtu marka ay xanaanooyinka dhameeyaan ee ay bilaabayaan dugsiyada waxa lagula talinayaa degmooyinku in ay diyaariyaan hab wada shaqayneed oo caruurta iyo waalidku ula jaanqaadi lahayaan xaaladdan cusub,xannaanooyinkuna waa in ay qorshe sannadeedkooda ku jirta marxaladdan kal guurka ah, taas oo u fududayn doonta waalidiinta in ay helaan macluumaad ku filan.

Waajibaadka xeerka waxbarashada ee ardayda laga tirada badanyahay waxaa qeexaya.

Sharciga waxbarashada qodobka § 2-8.

> § 2-8 *Waxbarashada gaarka ah ee ku saabsan luqadda (noorwiijiga) oo Loogu talo galay ardeyda ku hadasha luqadaha laga tiro badanyahay.*
>
> Ardeyda dhigata dugsiyada dhexe/hoose ee ku hadasha luqadaha aan ahayn (Noorwiiji amma Saami) waxay xaq u leeyihin in ay helaan waxbarasho gaar ah oo ku saabsan luqadda (Noorwiijiga) illaa inta ay luqadda Noorwiijiga si fiican u baranayaan, si ay ula jaanqaadaan waxbarashada rasmiga ah ee lagu bixiyo dugsiyada hoose/dhexe. Waxa kale oo ay xaq u leeyihiin in la baro afkooda hooyo amma afkooda hooyo iyo noorwiijiga waa haddii loo baahdo.

Afka hooyo waxay ku baran karaan dugsi kale oo aan ahayn kan ay ku qaataan waxbarashado maalmeedka.

Haddii ay suurto gal noqonweydo in ardeydu helaan waxbarashada afka hooyo/noorwiijiga, waxa degmada ku waajiba in ay ardeyda u diyaariso waxbarasho kale oo la jaanqaadi karta heerka aqoontooda.

Degmadu waa in ay ardeyda qiimayn ku sameeyaan, ka hor inta aanay og'aamin siinta waxbarashada gaarka ah ee luqadda ku saabsan. Qiimaynta waxa kale oo la samayn karaa inta ay ku dhex jiraan waxbarashada luqadda si loo ogaado heerka waxbarasho ee ay luqadda ka gaadheen, si ay ula socdaan waxbarashada caadiga ah ee ka socota dugsiyada hoose/dhexe ee degmada.

# FASIRAADA EREYADA

**Luqadda labaad:** Waa luuqadda labaad ee caruurtu barato ee u dheer afka hooyo.

**Afka dadka tirada badan:** Waa afka ay ku hadlaan bulshada wadanka loo martida yahay, marka aynu noorway joogno waa afka noorwwijiga.

**Afka dadka laga tirada badanyahay:** Waa luuqadda bulshada inteeda tirada yari ku hadasho,haddii aynu tusaale u soo qaadano noorway waa afka ay ku hadlaan dadka kale gidisan ee Samiga ah ee ku nool waqooyiga, waxa kaloo ka mid ah luuqadaha ay ku hadlaan dadyawga soo galeetiga ah sida somaaliga ,carabida turkiga vietnaamiska polishka iyo tigriniiaha.

**Afka hooyo:** Waa afka hooyo taas oo loo aqoonsanyahay in ay tahay luuqadda ilmuhu barto marka ugu horaysa una ah astaanta dhaqankiisa.Qaybo dadka ka mid ah luqada badan baa noqonkara afkooda hooyo.

**Luuqadaha badan:** Laba luuqad leh taas oo manaheedu yahay in ilmuhu ku hadlo laba luuqadood amma in ka badan.

Heftet er utarbeidet av Nasjonalt senter for flerkulturell opplæring, NAFO

Nafo.oslomet.no

Alle foto: Marte Garmann